

## Su'aalo & Jawaabo ku saabsan Xog-ururinta

### LA SOCOSHADA WAQTIGA DHEER EE XAALADAHAA BAADHISTA EE CARRUURTA DHALATA

#### **Maxay Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) u uruurisaa macluumaadka ku saabsan carruurta qaba xaaladaha ay ku jiraan Baadhista Ilmaha Dhasha ee Minnesota?**

Waxaanu u isticmaalnaa macluumaadka aan uruurino si aan u ogaanno haddii carruurta iyo qoysaskooda ay helaan taageerada iyo kheyraadka ay rabaan oo ay u baahan yihiin. Waxaanu la shaqeynaa waalidiinta, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka, barayaasha, kalkaaliyayaasha caafimaadka dadweynaha ee degaanka, ururada bulshada ku salaysan, iyo kuwa kale haddii loo baahdo si loogu xidho qoysaska kheyraadka, adeegyada, iyo taageerada. Adeegyada waxaa ku jiri kara kuwa taageera korriinka iyo horumarka, sida wax-ka-qabadka hore, caafimaadka dadweynaha, iyo daryeelka caafimaadka. Adeegyadan iyo kheyraadkan ayaa qoysaska siinaya macluumaad ay kaga fikiraan marka ay go'aannada gaarayaan. Waxaanu ka shaqeynaa inaan ka dhigno adeegyada kuwo la heli karo, fududahay in la isticmaalo, oo waxtar u leh qoysaska. Waxaanu sidoo kale ku dadaalnaa inaan fahamno oo aan hagaajinno natiijooyinka carruurta waqti kadib. Macluumaadka aanu ururino wuxuu naga caawiyaa inaan la socono isbeddellada guud waxayna ina tusinaysaa waxa jira iyo waxa aan shaqaynayn.

#### **Sidee MDH ku ogaataa xaaladda ilmaha?**

Kadib marka daryeel bixiyaha caafimaadka ee ilmaha uu ogaado xaaladda, waxay u wargeliyaan MDH [[Xeerka.Minn. § 144.125, qayb-hoosaad 1\(b\)](#)].

#### **Waa maxay macluumaadka ay MDH ka uruuriso carruurta leh xaaladahan?**

Waxaanu uruurinaa xogta tirakoobka waxaanan uruurin karnaa macluumaadka ku saabsan baaritaanka, ogaanshaha, adeegyada iyo taageerada, wax-ka-qabadka, iyo natiijooyinka xilliga carruurnimada. Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan macluumaadka aanu ururinay, fadlan kala xidhiidh Carruurta iyo Dhalinyarada MDH ee leh barnaamijka Baahiyaha Caafimaadka Gaarka ah lambarkan 1-800-728-5420.

#### **Yaa heli kara macluumaadkan?**

Kaliya shaqaalaha magacaaban ee MDH iyo qandaraasleyaasha ayaa heli kara xogtan. MDH waxay si dhab ah u qaadataa asturnaanta. Sharciyo adag oo ku saabsan asturnaanta xogta ayaa ilaaliya macluumaadkan (Xeerka.Minn. § 13). Shaqaalaha iyo qandaraasleyaashu waxay dhammaantood dhammaystireen tababarka asturnaanta xogta. Macluumaadka ku jira kaydka xogta si taxadar leh ayaa loo ilaaliyaa. Maaha mid guud. Intaa waxaa dheer, waxaanu kaliya u soo wargelinaa macluumaadka wadar ahaan. Tani waxay ka dhigan tahay in nambarada la isku

## QUESTION & ANSWERS ABOUT DATA COLLECTION

daray oo loo soo koobay koox ahaan iyo in macluumaadka lagu aqoonsan karo shakhsi ahaan, sida magacyada iyo taariikhda dhalashada, aan lagu darin.

Minnesota Department of Health  
Children & Youth with Special Health Needs  
PO Box 64975  
St. Paul, MN 55164-0975  
800-728-5420  
[health.cyshn@state.mn.us](mailto:health.cyshn@state.mn.us)  
[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

December 2022

*To obtain this information in a different format, call: 800-728-5420.*